

---

## CUTUB 2: BEDBAADADA DABKA

---

---

### Cutubkan waxaad wax uga baran doontaa:

- **Habdhiska Dabka:** Sida uu dab u dhaco, noocyada dabka, iyo sida loo doorto habka ugu saxsan ee nooc kasta oo dab ah loo demiyo.
- **Khataraha Dabka:** Kataro dabeedka la fili karo ee guriga iyo goobta shaqada, iyo tabta dab ka hortegidda.
- **Bedbaadada Dabka:** Sida loo qiimeeyo dababka, loo cabbiro qalabka dab la dagaallanka, oo loona go'aansado hab wax qabad.
- **Dab bakhtiiyeyasha La-qaadan Karo:** Noocyada la qaadi karo ee dab bakhtiiyeyasha ah iyo sida loogu shaqeeyo.
- **Bedbaadada Dab-xakamaynta:** Sida loo go'aansado haddii ay habboon tahay inaad isku daydo inaad dab demiso, sida loo wajaho oo si nabdoon loogu demiyo dabka.
- **Wadashaqayn:** Muhiimadda la shaqaynta jaalle.
- **Aaladda Khatarta leh:** Sida loo aqoonsado alaabta aadka u halista ah ee kaydsan ama la safrinayo ama gurigaaga taalla.



**CUTUB 2: BEDBAADADA DABKA**

**HIMILOOYINKA**

Gabaggabada cutubkan, ka qaybgalayaashu waxay awood u yeelan in ay:

- Sharxaan doorka CERTyada ee bedbaadada dabka.
- Aqoonsadaan oo yareeyaan khatarta ka iman karta dabka ee guriga iyo goobta shaqada.
- Ku samaynta qaymayn asaasi ah gurmada dabka.
- Ku shaqeeyaan dabdemiyaaha gacanta lagu qaadan karo si saxan.
- Fahmaan taxaddarrada ugu yare e nabdoonaanta, oo ay ku jiraan qalabka nabdoonaanta, xakamaynta yutiilitida, habka jaallaha, iyo kooxha taageerada.
- Aqoonsadaan meelaha ay maaddooyinka halista ahi ka yaalliin bulshada iyo guriga oona ay yarayn karaan halista alaabaha khatarta ahi ay ku hayaan guriga.

**WAJAHADDA**

Wajahadda cutubkan waxaa ka mid noqon doona:

- Arar iyo Guudmar Cutubka ah
- Habdhiska Dabka
- Yaraynta Halista Dabka ee Guriga iyo Meesha Shaqada
- Qaymaynta CERT
- Qalabka Dabdeminta
- Nabdoonaanta Dab Xakamaynta
- Layli: Xakamaynta Dababka Yaryar
- Maaddooyinka Halista ah
- Gabaggabada Cutubka

**WAQTIGA LAGU  
QIYAASAY IN LAGU  
DHAMEEYO**

2 saacadood 30 daqiiqo

**DARIIQADA  
TABABBARKA**

Adigoo soo bandhigaya nabdoonaanta dabka, macallinka ayaa qeexahaya habdhiska dabka iyo heerarka dababka isagoo adkaynaya muhiimadda xulashada dariiqooyin sax ah iyo nidaam looga bedbaado dabka.

Dabadeed, macallinku wuxuu bandhigayaa gud-mar khataraha ah oo guriga iyo goobta shaqada ah oo ay ku jirto khataraha korantada, khataraha gaaska dabiiciga ah, iyo hoorarka guban kara iyo kuwa olola, wuxuuna hoggaaminayaa wadahal ku saabsan halis yarayn iyo u diyaarsanaan.

Baraha ayaa dabadeed wuxuu qeexayaa tabaha CERT ee qiimaynta xaaladaha ku tacalluqa dabka iyadoo ay qaymayntu ku jirto wuxuuna sharxayaa sida loo isticmaali tig-layska qaymaynta markii la samaynayo qaymayn ama helidda xaddiga dhibka jira.

**DARIIQOYINKA  
TABABBARKA  
(WELI SOCDA)**

Mawduuca xiga wuxuu noqon doonaa ka wada hadlid aaladda dabdeminta oo ay ku jiraan dab bakhtiiyayaasha ama tabo xariifnimo cusub ah sida baraagaha, wasaqda ama carrada iyo tuubbada jardiinada waraabisa. Muhiimad gaaraha loo yeelayaa dabdemiska la qaadan karo sababtuna waa in ay noqon doonaan qalabka ay si guud u haysan doonaan CERTyadu. Ka wada hadalka dab bakhtiiyayaasha waxaa ka mid noqon doona nooca, waxyaabaha uu ka kooban yahay, go'aansiga isticmaalka dabdemis, iyo habka saxda ah ee loo isticmaalo dabdemiska.

Ka bedbaadidda dabku wuxuu noqon doonaa mawduuca xiga. Baraha ayaa soo bandhigi doona isticmaalka qalabka dab ka bedbaadidda, waxaaanu muhiimad gaar ah siin doonaa xerarka bedbaadada dabdemiyaha, oo ay ku jirto isticmaalidda habka jaalennimada iyo kooxda taageerada, iyo farsamooyinka dabka loola diriro (tusaale., ciriiri dabka, dhulka u dhawow, aqoonso wadiiqo kale oo aad ku baxdo, iwm.).

Marka xigta, baruhu wuxuu daaddihin doonaa wadahadal ku saabsan maaddooyinka halista ah oo ay ku jirto meesha laga helo, calaamadinta, kaydinta, iyo tabaha difaaca ee shilalka maaddooyinka halista ah.

Ugu dambayn cutubku wuxuu ku dhamaan doonaa layli ay gudihiisa ka qaybgalayaashu u shaqayn doonaan kooxo labo labo ah iyagoo isticmaalaya dabdemis si ay u bakhtiiyaan dab gaas ka kacay.

---

**WAXYAABAHA LOO  
BAAHAN YAHAY**

- *Tilmaanta Macallinka ee Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada*
- *Buugga Ardayga ee Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada*
- Muuqaallada 2.1 ilaa 2.19

---

**QALAB**

Ka sakow qalabka ku taxan wajiga hore ee Tilmaanta Macallinka, qalabka soo socda ee dheraadka ah ayaa loo rabaa cutubkan:

- Kombiyuutar leh barnaamijka PowerPoint
- Kombiyuutar borojektar leh ama shaashad weyn
- Muunado ah NFPA 704 Diamond iyo calaamado maaddooyin kaloo halis ah, hadday suuraggal tahay
- 1 duub oo cadad suufaf ah
- 1 dhalo Pyrex® oo fur leh
- 1 sanduuq oo tarraqa jikada oo looxa ah ah
- 1 dab-demiye biyo ah
- 1 dab demiye kimiko oo qallalan ah
- Dabdemisyada la qaadan karo oo noocyada A:B:C ah (hal xabbo shan kasta oo ka qaybgale) ( Dabdemisyada A:B:C na waa la isticmaali karaa.)
- Daawe Dabeed (eeg bogga 2-4)
- Jid-ifiyayaasha iyo tiir dheer

**QALAB  
(WELI SOCDA)**

Haddii uu waqtigu saamaxo, fiidiyooga, *Fire Extinguishers: Fight or Flight*, ayaa loo ammaanaa cutubkan. Fiidiyoogani wuxuu bixiyaa xog ku saabsan waxyaabaha asaasiga ah ee dabka wuxuuna muujiyaa sida loo isticmaalo noocyada kala duwan ee demiyeyaasha ah. Fiidiyoogani waxaa laga heli karaa:

Maamulka Qaranka ee Dhawrida Dabka  
(National Fire Protection Administration)  
1 Batterymarch Park  
Quincy, MA 02269  
800/344-3555

Sidoo kale fiidiyooga, *On Fire: A Family Guide to Fire Safety*, waa la amaanay, waxaana ku jira muuqaallo muhim ah oo habdhiska dabka ah, holaca sare, isticmaalka dabdemiska, iyo bakhtiinta dabka jikada. Fiidiyoogani waxaa laga heli karaa:

KCET Video  
4401 Sunset Boulevard  
Los Angeles, CA 90027  
800/343-4727

Haddaad fiidiyooga (yada) isticmaalayso, alaabta dheeraadka ah ee soo socota ayaa loo baahan doonaa:

- Fiisii aar (Videocassette player)
- Shaashad (Monitor)

---

**OGEYSIIN**

Qorshe waqtiyeedka cutubkan loo gartay waa sida soo socota:

Arar iyo Guudmar Cutubka.....	10 daqiiqo
Habdhiska Dabka.....	10 daqiiqo
Yaraynta Halista Dabka ee Guriga iyo Goobta Shaqada.....	15 daqiiqo
Qaymaynta CERT .....	5 daqiiqo
Qalabka Dabdeminta .....	25 daqiiqo
Bedbaadsanaanta Dab Xakamaynta.....	10 daqiiqo
Maaddooyinka Halista ah.....	10 daqiiqo
Layli: Xakamaynta Dababka Yaryar .....	60 daqiiqo
Gabagabada Cutubka .....	5 daqiiqo


***Wadarta Waqtiga: 2 saac 30 daqiiqo***

---

**KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA**  
**CUTUB 2: BEDBAADADA DABKA**

OGEYSIIN

Dhismaha daawe dabeed hoos ayaa lagu muujiyey.



UNIT 2: FIRE SAFETY



U ARARO  
(GUUD MAR)  
CUTUBKA

**SOO DHAWEYNTA IYO ARARTA CUTUBKA**

Cutubkan ku fur adigoo ka qaybgalayaasha ku soo dhaweynaya Cutubka 2 ee barnaamijka tababbarka CERT.

Bar dadka barihii cusub oo kaa caawin doona xisaddan.

Bandhig nabdoonaanta dabka adigoo ka qaybgalayaasha u sheegaya in musiibada dhexdeeda iyo markii markaa ay dhamaatayba, muhiimadda koowaad ee adeegyada xirfadleyda ah ee dabka waa in ay naf bedbaadiyaan iyo in ay demiyaan dababka waaweyn. Waxaa caqabad ku noqon kara jidad aan la gudbi karayn, sahay biyo oon ku fillayn, xaaladda cimilada, maaddo gubanaysa, iyo sahay aan ku fillayn hawsha deminta iyo bedbaadinta.



MUUQAAL 2.1

**Soo Dhaweynta iyo Ararta Cutubka**

Doorka CERTyada ee bedbaadada dabka:

- Demi dababka yaryar.
- Ka hortag dabab dheeraad ah.
- Xir yuutilitida oo dhan.
- Wax ka gal raridda dadka meeshay muhiim ka noqoto.

Muuqaal 2.1

Carrabka ku adkee in CERTyadu ay bedbaadada dabka ka ciyaaraan door aad muhim u ah iyagoo:

- Deminaya dababka yaryar intaanay noqon dabab waaweyn. Cutubkani wuxuu tababar ka bixin doonaa sida loo isticmaalo dab-demiye si loo demiyo dab yar—iyo sida loo ogaado markuu dabku yahay mid weyn oo aan la tahlil karayn.
- Ka hortegaya dab hor leh iyadoo la fogeynayo ilaha shidaalka. Cutubkani wuxuu sidoo kale qeexi doonaa sida loo xaqiijiyo in dabka, markiiba la bakhtiiyo, buuxda loo bakhtiiyey oo uu bakhtisnaado.

XUSUUSTA  
BARAHA

### SOO DHAWEYNTA IYO ARARTA CUTUBKA (WELI SOCDA)

- Xiraya Yutiilitiga, marka ay muhiim noqoto ayna habboon tahay arrintaasi.
- Caawinaya ka bixidda markay muhiim tahay. Markii uu dabku ka cuslaado in ay CERTyadu demin karaan, xubnaha CERT ayaa waxay u baahan yihiin in ay nafyawga bedbadiyaan iyagoo amraya in meesha laga baxo, markay muhiim noqoto, iyo in ay soohdimo sameeyaan.

**In kastoo ay CERTyadu cawin ka geystaan ka bixidda meel belo, hannaanka wax loo raro koorsadani kama hadlayso. Waxaa la doo jeedinayaa in arrintan looga hadlo tababbar dheeraad ah oo kale.**

Carrabka ku adkee in xubnaha CERT ay caawiyaan gurmadyada dabka la xiriira, marka ay jawaabayaasha xirfadleyda ah (mushaarreyaal iyo mutaddawiciinba) ay daahaan. Marka ay jawaabayaan, xubnaha CERT waa in ay maskaxda ku hayaan halbeegyada CERT ee soo socda:

- Bedbaadada samatabbixiyeyaasha ayaa had iyo goor ah muhiimadda koowaad. Sidaa awgeed xubnaha CERT waxay weligood:
  - La shaqeeyaan jaallahood/saaxiibkood.
  - Xiro lebbiska bedbaadsanaanta (galoofyada, halmalyo , ookiyaale, maaskaro, iyo buud).
- Himilada CERT waa in ay samayso wanaagga u badan tirada dad ee u badan.

### HIMILOOYINKA CUTUBKA

MUUQAAL 2.2

#### Himilooyinka Cutubka

- Sharaxaadda doorka ay CERTyadu ka cayaaraan bedbaadada dabka.
- Ogaashada iyo yaraynta khatarta ka iman karta dabka guriga iyo goobta shaqada.
- Qabashada cabbir asaasi ah oo gurmada dabka ah.
- Fahmida taxaddarrada ugu yar ee bedbaadsanaanta.
- Garashada meelaha ay yaalliin aaladda khatarta leh ee dhex taal mujtamaca iyo guriga.
- Deminta dababka yaryar iyadoo la adeegsanayo dab bakhtiye.

Muuqaal 2.2



**SOO DHAWEYNTA IYO ARARTA CUTUBKA (WELI SOCDA)**

U sheeg ka qaybgalayaasha in markuu dhamaado cutubkan ay tahay in ay awood u leeyihiin in ay:

- Sharxaan doorka ay CERTyadu ka cayaaraan bedbaadada dabka.
- Ogaadaan oo yareeyaan khatarta ka iman karta dabka guriga iyo goobta shaqada.
- Qabtaan cabbir asaasi ah oo gurmada dabka ah.
- Fahmaan taxaddarrada ugu yar ee bedbaadsanaanta, oo ay ka mid yihiin:
  - Bedbaadada qalabka.
  - Xakamaynta yutiilitiga.
  - Habka jaallennimada.
  - Kooxaha gurmada.
- Gartaan meelaha ay yaalliin aaladda khatarta leh ee dhex taal mujtamaca iyo guriga, yareeyaanna khatarta ka imanaysa alaabta khatarta leh ee guriga dhex taal.
- Demiyaan dababka yaryar iyadoo la adeegsanayo dab bakhitiye.

Guudmar mawduuca adigoo ka qaybgalayaasha u sheegaya in cutubku uu siinayo aqoonta iyo xirfadaha ay ugu baahan doonaan si ay u baabbi'yaan ama u yareeyaan khataraha dabka oo ayna u demiyaan dababka yaryar. Aagagga ay wax ka baran doonaan waxaa ka mid ah:

- Sida ay dababku u billowdaan iyo waxa sii guba.
- Ogaashada khataraha dabka ee guriga, derisyada, iyo goobta shaqada.
- Sida loo sameeyo qiimaynta, ama qiyaasidda dabka.
- Kaabayaasha dab-demineed ee ugu weyn ee ay CERTyadu heli karaan iyo sida loo isticmaalo.
- Hannaanka dab-deminta nabdoon.
- Garashada alaabta halista ah.

Kooxda u sheeg in dhamaadka cutubkan, ay heli doonaan fursad ay dab ku bakhitiyaan iyagoo isticmaalaya dab-demiyaha gacanta lagu qaadan karo.



XUSUUSTA  
BARAHA



MAWDUUCA  
SHEEG



WEYDII SU'AAL



MUUQAAL 2.3

### HABDHISKA DABKA

Muuji fiidiyoo si aad u tusto qodobbo ku jira cutubka.

Mawduucan billow adigoo su'aasha soo socota weydiinaya:

Qofna ma yaqaan waxa dab ka keena in uu gubto?

#### Saddex-xagalka Dabka

- Kul
- Shidaal
- Oksijiin

Muuqaal 2.3

Haddii aanay sheegin ka qaybgalayaashu, u sheeg in dabku uu u bahan yahay saddex walxaad si uu u jiro:

- Kul: Kul waxaa loogu baahan yahay in uu sare u qaado heerkulka alaabeed ilaa barta qaraxa.
- Shidaal: Shidaalka dabeed waxa uu noqon karaa adke hoor ama neef. Nooca iyo tirada shidaalka ayaa go'aamisa habka la isticmaalayo si loo demiyo dabka.
- Oksijiin: Dababka inta badan waxay si xooggan ugu gubanayaan atmoosfeerka ay ku jirto ugu yaraan 20 boqolkiiba oo oksajiin ah. Oksajiin la'aanteed, shidaallada badidooda waa la kululayn karaa inta ay ka uumi baxayaan, markaa mana ay gubanayaan.



PM, P. 2-3

**HABDHISKA DABKA (WELI SOCDA)**

Sharax in iyagoo wada shaqaynaya ay saddexdaa walxood oo lagu magacaabo *saddex-xagalka dabka* abuuraan falcelin kul-gube oo kiimikaad, kaas oo ah dabka.

U dir ka qaybgalayaasha jaantuska *Saddex Xagalka Dabka* ee ku yaal Buugga Ardayga.

Carrabka ku adkee in haddii mid ka mid ah ah walxahaasi uu maqan yahay, ama midkood meesha laga saaro, dab aanu dhacayn amaba uu bakhtinayo.

U sheeg kooxda in aad iminka tusi doonto ra'yiga saddex xagalka dabka adigoo oksijiinta ka saaraya suuf gubanaya.

XUSUUSTA  
BARAHA

**Isticmaal tallaabooyinka soo socda si aad ra'yiga u muujisid:**

1. Dab ku dheji suuf duuban, ku rid dhalo Pyrex<sup>®</sup> ah dhexdeed, si adagna u dabool.
2. Sug inta uu holacu ka baxayo.
3. Shayga ka soo saar dhalada oo afuuf si aad u muujiso in haddii aanan dadka toos loo bakhtiinin in ku daridda oksajiin ay dhamaystirayso saddex xagalka dabka oo uu dabhii shidmayo.

Carrabka ku adkee baahida loo qabo in la xaqiijiyo in shay kasta oo gubanaya si buuxda loo bakhtiyo. U sheeg ka qaybgalayaashu in ay ka fikirnaan sheekadii *Smokey the Bear* iyo *campfires* si ay qodobkan u xasuusnaadaan.



MUUQAAL 2.4

**Habdhiska Dabka**

Heerarka dababka:


- A: Caadiga u guban kara
- B: Hoorarka ololi kara gubanna kara
- C: Qalab koranto oo tamaraysan
- D: Biraha guban kara

Muuqaal 2.4



PM, P. 2-3

Saddex Xagalka Dabka



Saddex Xagalka Dabka: Shidaal, oksajiin, iyo kul waxay keenaan falgal kiimikaad oo sababa dabka.



XUSUUSTA  
BARAHA

### HABDHISKA DABKA (WELI SOCDA)

U sheeg ka qaybgalayaasha in si loo caawiyo dab-deminta, dababka loo kala saaro heerar ku salaysan caynka uu yahay shidaalka gubanaya:

- Dabka Heerka A: Gubtayaasha caadiga ah sida xaashi, dhar, xaabo, cinjir, iyo bacyaal badan

**Dib ugu noqo oo adkee baahida loo qabo in la bakhtiiyo dababka Heerka A (taasi waa., in la xaqiijiyo in cad kasta oo walax gubanaysay ah si buuxda loo demiyo).**

- Dabka Heerka B: Hoorarka ololi kara (sida., saliidaha, gaaska) iyo hoorarka hulaaqi kara (sida., hooraka qaraxadda dhuxusha, gaaska) (Shidaalladani waxay ku gubtaan guudka oo keliya maxaa yeelay oksijiin ma geli karto moolka hooraka. Uumi keliya ayaa gubta markii la qarxiyo.)
- Dabka Heerka C: Qalabka korantada ee tamaraysan (sida., taararka, matoorrada). (Markii la demiyo korantada, dabkii wuxuu noqonayaa dabka heerka A.)
- Dabka Heerka D: Biraha gubta (sida., aluuminam, magneeshiyam, tiitaaniyam)

Adkee in ay aad muhiim u tahay in la garto nooca shidaalka si loo doorto dariiqada saxda ah iyo qaabka loo marayo deminta dabka.

**Weydii kooxda haddii ay jirto cid wax su'aalo ah ka qabta habdhiska dabka.**

Sharax in qaybta xigta ee cutubka ay ka hadli doonto yaraynta halista dabeed ee guriga iyo goobta shaqada.



**MAWDUUCA  
SHEEG**



**WEYDII SU'AAL**



**WEYDII SU'AAL**

**YARAYNTA KHATARAHA DABKA EE GURIGA IYO GOOBTA  
SHAQADA**

Sharax in qaybtani ay ka hadli doonto garashada iyo ka hortegidda halista dabeed ee guriga iyo goobta shaqada.

Mawduuca ku billow weydiinta su'aasha soo socota:

**Waa maxay halista dabeed eek a jiri karta guryaha iyo goobaha shaqada?**

U oggolow kooxda waqti ay ku jawaabto. Bixi soo jeedinno ah halisyo dabeed oo dheeraad ah.

Adkee in qayb ka mid ah qorshaynta CERT ay tahay in la garto khataraha ka jira aagga oo saamayn doona degganayaasha markii ay gurmada dhacdo. Xogtaan waxay muhiim u tahay jawaabayaasha xirfadleyda ah marki ay kobta ay wax ka dheceen yimaadaan.

**Maxaa tallaabo ahood qaadday si aad u dhinto ama uga hortagto khataraha?**

Isticmaal jawaabaha ka qaybgalayaasha si aad u samayso qodobbada soo socda:

Mid kasta oo inaga mid ah waxaa gurigisa ama goobtiisa shaqada ka jira nooc khatar dabeed ah. Inta badan khatarahaasi waxay ku soo dhacaan dhawr cayn:

- Halisyo koranto
- Halisyo gaasaska dabiiciga ah
- Hoorarka ololi kara ama guban kara

Tilmaan in guryaha iyo meelaha shaqada waxay yeelan karaan leeyihinna khataro kale, oo ay ku jirto alaabo aan isku habboonayn oo lagu kaydsho meelo isu dhaw.

Tallaabooyin sahlan oo dab ilaalin ah ayaa meel wanaagsan ka gaari kara yaraynta suuraggalnimada dababka:

- Marka hore, meel ku ogow ilaha ay qaraxyadu ka suurogalaan.
- Dabadeed, samee waxaad awooddo si aad u yarayso ama u baabi'iso khataraha.



MUUQAAL 2.5

**YARAYNTA KHATARAHA DABKA EE GURIGA IYO GOOBTA  
SHAQADA (WELI SOCDA)**

**KHATARAHA KORANTADA**

**Yaraynta Khataraha Dabeed ee Guriga iyo  
Goobta Shaqada**

- Iska jir “carsaanyada korantada (fiilooyin isku qasan).”
- Ha marinin bareesyada roogga hoostiisa.
- Fiilooyinka korantada ama bareeska jabay ama dub-kacay beddel.
- Qalabka koranto dayactirka u joogtee.

Muuqaal 2.5

Sii kooxda tusaale caam ah oo khataraha korantada ah iyo dariiqooyinka sahlan ee lagu yarayn karo ama lagu baabbi'in karo:

- Ka fogow “carsaanyo koranteedka.” Yaanay meesha ka jirin isku-guntamid fiilooyin iyo bareesooyin koranto ah. Ha rardhaafin qabte-bareesyada korantada. Ha surin marin maayadeed marin kale oo maayadeed.
- Ha marinin fiilada korantada roogga hoostiisa.
- Si dhaqso ah u beddel fiilooyinka dillaacay ama rifmay.
- Aaladda korantada si wacan u dhaqaalee. Dayactir ama beddel aaladaha shaqo gaba.

**YARAYNTA KHATARAHA DABKA EE GURIGA IYO GOOBTA  
SHAQADA (WELI SOCDA)**

Point out that emergencies sometimes occur despite our best efforts. In the event of an electrical emergency:

Tilmaan in mashaqooyinku ay mararka qaar dhacaan innagoo aad u dedaalayna. Markii ay dhacdo mashaakil koranto:

- Ogow meesha ay ku yaalliin badhannada laga demiyo korantada.
- Ogow meesha uu ku yaal koranto goynta fiyuusyadeeda iyo kala-qabtegeedu ay ku yaalliin iyo sida loo demiyo korantadaba.
- Saacad gef u wareeji fiyuusyada deedna demi gooyayaasha yaryar marka hore, dabadeedna demiyaha weyn ama kala-qabtaha ka demi.
- Marka aad korantada shidaysid, daar badhanka weyn oo daaraha ah marka hore dabadeedna fasax fiyuusyada ku yaal kala qabtayaasha yaryar.

Carrabka ku adkee in ka qaybgalayaashu aanay gelin taxi daad ku soo rogmaday si ay korantada u demiyaan, maxaa yeelay biyaha ayaaba korantada qaada.

U dir ka qaybgalayaasha sawirrada, *Santuuqa Sirkus iyo Santuuqa Fiyuus* ee ku yaalla Buugga Ardayga.



PM, P. 2-6



XUSUUSTA  
BARAHA


**Isla eega borotokoolka yutiilitida wakiil ka yimid shirkadda yutiilitida ee maxalliga ah, taana u gudbi ka qaybgalayaasha. Hadday suuroggal tahay samaysi qaab tababbar iyo muraajico joogto ah. Iyadoo ku xiran meesha aad joogto, waxaa kalood dooran kartaa meesha laga xiro gaaska baroobeynta.**





PM, P. 2-6

Xiridaha



**Sanduuqa Sirkutka oo Demin leh**

Sanduuqa sirkut oo muujin  
tallaabooyinka deminta. Tall. 1:  
Demi qaadayaasha mid midka ah.  
Tall. 2: Demi demiyaha weyn.

**Sanduuqa Fiyuska oo Demin leh**

Sanduuqa fiyuska oo muujin  
tallaabooyinka deminta Tall. 1:  
Soo sib fiyusyada mid midka ah.  
Tall. 2: Soo jiid demiyaha weyn.

**YARAYNTA KHATARAHA DABKA EE GURIGA IYO GOOBTA  
SHAQADA (WELI SOCDA)**

**KHATARAHA GAASKA DABIICIGA AH**

Sharax in gaaska debiiciga ah uu keeno labo nooc oo khatar ah.  
Waana:

- Miire oo jirka ka dhameeya oksajiinta.
- Qarax oo sahal u guban kara.



**MUUQAAL 2.6**

**Yaraynta Khataraha Dabka Guriga iyo Goobta  
Shaqada**

- Rakibo baare gaaska dabiiciga.
- Meel ku ogow oo calaamadee xiridda gaaska

Muuqaal 2.6

Sii ka qaybgalayaasha dhawr tusaale oo ku saabsan yaraynta  
khatarta gaaska dabiiciga ah:

- Ku rakib baare gaas dabiici ah meel u dhaw tannuurka iyo  
haanta biyaha kulul. Baaraha tijaabi bishiiba si aad u hubiso  
in uu shaqaynayo.
- Meel ku ogow oo calaamadee waal (alka) xiridda gaaska.  
(Waxaa jiri kara dhawr waal oo guri ku wada jira ka sakow  
xiraha weyn ee guud.) Baro sida loo xiro gaaska, meel  
gacantu gaartana ha yaalleen qalabka muhiimka ah si  
gaaska loogu xiro si degdeg ah.




**PM, P. 2-7**

U dir ka qaybgalayaasha sawirka, *Gaas-dabiici-ah Beege  
Xiriddii Leh* oo ku yaal Buugga Ardayga.



PM, P. 2-7

Gaas-dabiici-ah Beege Xiriddii Leh



Shaxanka gaas-dabiici-ah beegaha wuxuu muujinayaa meesha waalka xiridda ee beebka dhulka ka yimaada ku yaal. Si loo xiro waalka, isticmaal kiyaawe si aad waalka lid-saacad-socod ugu wareejiso hal afraad wareejineed.



XUSUUSTA  
BARAHA

### YARAYNTA KHATARAHA DABKA EE GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCDA)

Adkee in haddii iyadoo lagu jiro musiibo, haddii ay gaas uriyaan, ama ay arkaan mitirka oo sheegaya in uu gaas liigayo ama uu dab jiro, ka qaybgalayashu waa in ay gaaska ka xiraan bannaanka dhismaha. Markii uu adeeggaa gaasku xirmo, waxay uun iska tahay, in uu keliya soo celin karo farsamayaqaan tababbaran.

**Mar kale, kala tasho wakiil maxalli ah oo yutiilida qaabbilsan si uu u go'ansado borotokoollada haddii ay suuroggal tahayna uu abuuru muunad gaas-beege ah oo muujinaya oggolaanayana in lagu muraajiceeyo hannaanka gaaska lo xiro.**

Uga dig ka qaybgalayaasha in aysan abid yeelin in ay galaan taxtiga dhisme gubanaya si ay u xiraan wax yutiiliti ah.

### KHATARAHA HOORARKA OLOLI KARA



MUUQAAL 2.7

#### Yaraynta Khataraha Dabka Guriga iyo Goobta Shaqada

- Aqri sumadaha.
- Isticmaal hannaanka kaydinta ee L.I.E.S (Limit, Isolate, Eliminate, Separate). (Xadee, Go'doomi, Baabbi'i, Kala-sooc)

Muuqaal 2.7

Bixi dhawr tusaale oo lagu yareeyo halista ka timaadda hoorarka guban kara:

- Akhri sumadaha si aad u ogaato waxyaabaha ololi kara.
- U kaydi si habboon, adigoo isticmalaya qaaciddada L.I.E.S. ee lagu soo maray Cutubkii 1.



**XUSUUSTA  
BARAHA**

**YARAYNTA KHATARAHA DABKA EE GURIGA IYO GOOBTA  
SHAQADA (WELI SOCDA)**

U sheeg ka qaybgalayaasha in ay hoorka ololi kara ku demiyaan iyagoo isticmaalaya dab-bakhtiiye la qaadan karo oo loo doorbiday dabka heerkaas ah. U kala doorbididda dab-bakhtiiyeyaasha la qaadan karo waxaa looga hadli doonaa goor dambe oo cutubkan dhexdiisa ah.

**Sii kooxda xog ku saabsan sida nabdoon ee loo qubo maaddooyinka halista ah ee aaggaaga.**



MAWDUUCA  
SHEEG



MUUQAAL 2.8

### QIIMAYNTA CERT

Mawduucan billow adigoo kooxda u sharxaya in qiimaynta CERT ay tahay hannaan joogto ah oo xog uruurin ah oo ay ku xiran tahay in dab la xakameeyo iyo qorshaynta bakhtiinta dabka..

#### Qiimaynta CERT

Ka jawaab su'aalahan:

- Miyaan aniga iyo jaallahay dabka ula diriri karraa si nabdoon?
- Miyaan aniga iyo jaallahay haysannaa qalabka ku habboon?
- Ma jiraan khataro kale?
- Miyuu dhismuhu qaab ahaan u dhaawacan yahay?
- Miyaannu baxsan karnaa?

Muuqaal 2.8

Kooxda u sheeg in qiimaynta CERT ay ka jawaabto su'aalahan:

- Miyaan aniga iyo jaallahay dabka ula diriri karraa si nabdoon?
- Miyaan aniga iyo jaallahay haysannaa qalabka ku habboon?
- Ma jiraan khataro kale?
- Miyuu dhismuhu qaab ahaan u dhaawacan yahay?
- Miyaannu aniga iyo jaallahay baxsan karnaa?



XUSUUSTA  
BARAHA

**Haddii ay kula habboonaato, waa inaad sahashaa hannaanka qiimaynta ee hoose si aad u gudbiso walxaha waaweyn oo keliya. Qiimaynta waxaa si faahfaahsan looga hadli doonaa mar kale Cutib 5: Hawlgallada Goobidda iyo Samatabbixinta Yaryar.**

Tilmaan in qiimaynta ay tahay hannaan soconaya oo sagal tillaabo ah oo maka hore jawaabayaasha u suurogeliya in ay go'aamo qaataan oo ay si habboon wax uga qabtaan meelaha qaba baahida ugu weyn.



MUUQAAL 2.9

QIIMAYNTA CERT (WELI SOCDA)

Qiimaynta CERT

1. Runta Aruuri.
2. Qaymee Burburka.
3. Tixgeli Suuroggalnimada.
4. Qaymee Xaaladdaada.
5. Deji Muhiimado.
6. Gaar Go'aanno.
7. Samee Qorshe Hawleed.
8. Tallaabo Qaad.
9. U Kuurgal Horumarka.

Muuqaal 2.9

Sagaalka tallaabo ee qiimayntu waxay yihiin:

1. Runta ururi. Maxaa dhacay? Meeqaa qof baa ku lug leh (haddaad og tahay)? Waa maxay xaaladda taagan?
2. Qaymee oo gudbi dhaawaca. Ku soo wareeg dhismaha. Isku day inaad go'aamiso waxa dhacay, waxa haatan soconaaya, iyo side bay runtii u sii xumaan karaysaa.
3. Tixgeli suuraggalnimada. Maxay u badan tahay in ay dhacaan? Maxaa dhici kara haddii ay xaaladuhu sii fatahmaan?
4. Qaymee xaaladdaada caadiga ah. Ma ku sugan tahay khatar taagan? Ma lagu tababaray in aad wax ka qabato xaaladda? Ma haysataa qalabka aad u baahan tahay?
5. Deji muhiimado. Nololo miyaa khatar ku jira? Wax ma qaban kartaa? Xusuusnow, nabdoonaanta nafeed ayaa leh muhiimadda koowaad!
6. Gaar go'aanno. Ku sale go'annadaada jawaabaha tallaabooyinka 1 ilaa 3, adigoo u eegaya muhiimadihii aad degsatay.
7. Samee qorshayaal hawlgaal. Samee qorshe kugu caawin karo inaad xaqijiso muhiimadahaaga. Qorsheyaasha sahlan waxay noqon karaan hadal, laakiin kuwa adagi waa in ay qoran yihiin.



XUSUUSTA  
BARAHA



PM, PP. 2-11  
ILAA 2-15



XUSUUSTA  
BARAHA

### QIIMAYNTA CERT (WELI SOCDA)

8. Tallaabo qaad. Fuli go'aankaaga, adigoo qoraya wixii khaldama iyo wixii is beddela si aad xaaladda uga warbixin kartid jawaabayaasha ugu horreeya.
9. U kuurgal horumarka. Marba u kuurgal horumarkaaga ku saabsan gaariddaada himilada aad ku degsatay qorshaha hawlgalka si aad u ogaato wixii shaqaynaya iyo wixii ay tahay inaad wax ka beddesho si aad xaaladda u dheellitirto.

**Tilmaan in iyadoo ay qaymantu (sizeup) tahay eray bixin waaxda dabdemiska, barnaamijka hadda waxaa loo qoondeeyey CERTyada waana lagu isticmaali doonaa aagagga kale ee masuuliyadaha CERT. Bixi dhawr tusaale oo muujinaya farqiga u dhexeeya qiimaynta waaxda dabdemiska iyo qiimaynta CERT.**

U dir ka qaybgalayaasha *Tig-leyska Qiimaynta CERT* ee ku yaal Buugga Ardayga. Tilmaan in in kastoo aanu laysku dhamaystirayn, ay haddana ku jirto in badan oo ah su'aalaha ay xubnaha CERT tahay in ay is weydiiyaan marka la qiimaynayo xaalad dabeed. La muraajicee tig-leyska kooxda.

**Weydii Kooxda haddii ay jirto cid su'aalo ka qabta qiimaynta CERT.**

Sharax in ka dib qiimaynta xaaladda, tallaabada xigtaa ay tahay aqoonsiga khayraadka loo heli karo xakamaynta dabka.





PM, P. 2-11

TIG-LAYSKA (CHECKLIST) QIIMAYNTA EE DABKA

	Haa	Maya
<b>Tallaabo 1: Runta Ururi</b>		
<i>Waqti</i>		
▪ Miyay waqtiga maalinta ama usbuucu saamayn ku leeyihiin dedaalka dab xakamaynta?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Sidee?		
<i>Cimilada</i>		
▪ Miyay xaaladaha cimiladu saamaynayaan bedbaadadaada?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddaad tiri haa, side bay bedbaadadaadu u saamoobaysaa?		
Miyay xaaladaha cimiladu saamaynayaan xaaladda dabka?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddaad tiri haa, side bay xaaladda dabku u saamoobaysaa?		
<i>Nooca Dhismaha</i>		
▪ Waa nooc ee (yadee) qaababka dhismayaasha arrintan ku jira?		
▪ Waa nooc ee (yadee) dhismayaasha arrintan ku jira?		



TIGLAHA (CHECKLIST) QIIMAYNTA EE DABKA

	Haa	Maya
<b>Tallaabo 1: Runta Ururi (Weli Socota)</b>		
<i>Occupancy</i> Ku jiritaanka		
▪ Ma lagu jiraa dhismayaasha?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddaad haa tiri, meeqa dad ahaa laga yaabaa in ay wax ka soo gaaraan?		
▪ Ma jiraan tixgelinno gaar ah (sida. Carruur, waayeel?)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
<i>Khataraha</i>		
▪ Ma ku jiraan maaddooyin halis ah?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
▪ Ma jiraan noocyo khataro ah oo kale oo laga yaabo in lagu lug yeesho?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddaad haa tiri, waa maxay khataruhu?		
<b>Tallaabo 2: Qaymee oo Sheeg Dhaawaca</b>		
▪ Ku soo wareeg dhismaha. Dhaawacu miyuu ka durugsan yahay awoodda kooxda CERT?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
▪ Miyay shaqaynayaan khadaka warisgaarsiinta ee caadiga ah?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

**KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA**  
**CUTUB 2: BEDBAADADA DABKA**

**TIGLAHA (CHECKLIST) QIIMAYNTA EE DABKA**

**Talaabo 3: Tixgeli waxyaabaha dhici kara** **Haa** **Maya**

*Halista Nafeed*

- Ma jiraan haliso naf-gooyo ah oo dhici kara?    
Haddaad haa tiri, waa maxay halisuhu?

*Dariiqo Dabka*

- Miyuu jidka dabku ku socdo khatar gelinayaa meelaha kale?    
Haddaad haa tiri, meelahee kale oo khatar geli kara?

*Dhaawac Dheeraad ah*

- Ma jirtaa suuraggalnimo sare oo dhicitaan musiibo ah oo saamayn kara bedbadada shakhsiga?    
Haddaad haa tiri, waa maxay khataraha la yaqaan?

**Tallaabo 4: Qaymee Xaaladdaada**

- Maxaa qalab ahood haysataa oo aad ku xakamayn kartaa dabka?
  
- Qalabkee la heli karaa?

TIGLAHA (CHECKLIST) QIIMAYNTA EE DABKA

	Haa	Maya
<b>Tallaabo 5: Degso Muhiimado</b>		
▪ Miyay xakamaynta dabka si <i>nabdoon</i> isugu deyi karaan xubnaha CERT?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
<u>Hadday maya tahay, haysku deyin dab xakamayn.</u>		
▪ Ma jiraan baahiyo kale oo aad loogu baahan yahay iminka haatan ah?	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddaad haa tiri, tax.		

**Tallaabo 6: Qaado Go'aanno**

- Xaggee bay keenidda alaabta loo baahan yahay ka qabanaysaa waxa ugu wacan iyadoo la sii daa'imayo soohdin ku filan in lagu badbaadi karo?

**Tallaabo 7: Samee Qorshe Hawlgaleed**

- Sii go'aanso sida shaqaalaha iyo khayraadka kaleba loo geyn lahaa [kobta uu gurmادku ka dhacay.]

**TIGLAHA (CHECKLIST) QIIMAYNTA EE DABKA**

**Tallaabo 8: Tallaabbo qaad**

- Qorshayaasha hawlgeli.

**Tallaabo 9: U-kuurgal Horumarka**

- Si joogto ah u qiimee xaaladda si aad u ogaatid isbeddellada ku dhacay:
  - Baaxadda dhibaata.
  - Khataraha lagu jiro.
  - Oollidda agab ama khayraad la isticmaalo.
- Dheellitir tabaha markii loo baahdo.



MAWDUUCA  
SHEEG



MUUQAAL 2.10



XUSUUSTA  
BARAHA

### AGABKA DAB-LA-DIRIRKA

Billow cutubkan adigoo ka qaybgalayaasha weydiinaya waxa ku soo dhaca maskaxdooda markii ay ka fikiraan agabyada dab la dirirka.

#### Agabka Dab-deminta

Alaabaha la heli karo:

- Dab-bakhtiyayaasha la qaadan karo.
- Beebab gudaha ku jira oo qoyan.
- Ciriirin
- Khayraad “hal abuurimo”

Muuqaal 2.10

Haddaanay sheegin, u sheeg in agabyada dab la dirirka kuwa ugu caamsan ay yihiin:

- Dab-bakhtiyayaasha la qaadan karo.
- Beebab gudaha ku jira oo qoyan.

Xusuusi ka qaygalayaasha in dabdemiyaasha la qaadan karo ay yihiin kuwo aad muhiim ugu ah deminta dababka yaryar. Guri ama meelk shaqo oo si fiican loo diyaariyey waxay ugu yaraan haysanayaan labo dabdemiye oo la xambaari karo.

**Haddii ay ka qaybgalayaashu ka yimaadeen CERTyo dersaasha ah, ha siin tababbar beebabka taataagan ee qoyan ku saabsan.**

Sharax in beebabka gudaha ku jira oo qoyan waxaa inta badan laga helaa dhismayaasha la deggan yahay iyo kuwa ganacsiga waxaanu ka kooban yahay 100 fiid oo tubbo dahaaran oo 1½-inji ah oo caaraddiisu ay tahay a 3/8-inji oo u dabool ah. Waxay keenaan ilaa 125 gaaloon oo biyo ah daqiiqaddiiba..

U sheeg in ay weligood u shaqeeyaan kooxo saddex qof ka kooban marka la isticmaalayo beebab gudaha ku jira oo qoyan. Qof ayaa haya hooska, qofna wuxuu neefta ka qubaa xarigga, qofka kalena wuxuu xakameeyaa cadaadiska biyaha..



XUSUUSTA  
BARAHA

**AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)**

**Haddii looga fadhiyo in ka qaybgalayaashu ay isticmaalaan beebabka taagan ee qoyan marka lagu jiro musiibada, waxaa la soo jeediyaa in mid lagu siiyo tababbar inta lagu jiro tababbarka.**

Waxaad muujisaa in sidoo kale ay jiraan agabyo dab-demineed oo yaalla aanse can ahayn:

- Bedadka hoose, waxaa suuroggal ah in lagu go'doomiyo oo dabka iyo qiiqa iyo kulaylkaba la xaddido iyadoo albaabbada qolalka iyo hoolwayga la xirxiro.
- Agabyo kale oo xirfad dheeraad ah lagu sameeyey ayaa jiri kara:
  - Berkadda biyaha ama biyaha isbaada ama baaldiyada
  - Ciid, dhiiqo ama badeello
  - Tubbada beerta jardiinada [lagu waraabiyo]

Nooca shidaalka ee gubanaya ayay ku xiran tahay agabka loo isticmaalayo la dagaallanka dabkaas.

Waxaad ku dartaa in bacdamaa ay dab bakhtiiyayaashu yihiin kuwo caam ah, qaybtani iyaday diiradda saaraysaa.

**LAMBARINTA IYO CALAAMADINTA DAB-BAKHTIYAYAASHA**

U sheeg kooxda in dab-bakhtiiyayaasha la qaadi karo waa in ay lambariyaan oo ay idmaan *State Fire Marshal*-ka iyo *Underwriters Laboratories*. Waxaa loo lambariyaa iyadoo la eegi waxgalnimadooda ay demin karaan heerarka kala duwan ee dabka. Awooddooda iyo xoogoodaba waa in uu calaamadiyaa soo-saaruhu.

Sharax in calaamadda ay ku yaasho xog muhiim ah oo ku saabsan nooca (yada) dabka ah ee uu bakhtiiyahu ku habboon yahay.

U dir ka qaybgalayaasha muujiyaha *Calaamadinta Soo-saaraha* oo ku yaal Buugga Ardayga.




PM, P. 2-17





PM, P. 2-17

Calaamadinta Soo-saaraha



Calaamadinta soo-saaraha ee dab-bakhtiye oo tusaale ah oo muujinaya calaamadda Underwriters Laboratories oo kor ku yaal, nooca iyo dirka dab bakhtiyaha, hannaanka tijaabo ee la adeegsaday, iyo lambarka taxan. Salka calaamadda waxaa ku yaal xogta mariinada, oo ay ku jirto lanbarka aqbalidda ee U.S. Coast Guard.

AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)

NOOCYADA DAB BAKHTIYAYAASHA



WEYDII SU'AAL

Yaa magacaabi kara noocyada dab-bakhtiyayaasha gacanta lagu qaadi karo?



MUUQAAL 2.11

Noocyada Dab-bakhtiyayaasha

- Biyo
- Kiimiko qallalan
- Kaarboon dhayoksaydh
- Dab-bakhtiyayaal khaas ah

Muuqaal 2.11

Haddii aanay sheegin, kooxda u sheeg in ay jiraan afar nooc oo dab-bakhtiyayaal ah:

- Biyo
- Kiimiko qallalan
- Kaarboon dhayoksaydh
- Dab-bakhtiyayaal khaas ah



PM, P. 2-18









Sharax in qaybta xigta uu si kooban u sharxi doono dabeecadaha nooc kasta oo dab-bakhtiyeye ah. U dir ka qaybgalayaasha shaxda *Noocyada Dabka, Demiyeyaasha, iyo Dariiqooyinka* ee ku taalla Buugga Ardayga si aad u hesho guud-mar ku saabsan xogtaan.

La muraajicee kooxda noocyada dababka iyo dariiqooyinka loo demiyo.



PM, P. 2-18

Noocyada Dabka, Demiyeyaasha, iyo Dariiqooyinka

Nooca Dabka	Deminta	
	Demiyaha	Dariiqada
<b>Alaabta Adkaha ee Caadiga ah</b>  	Biyo	Bixisaa dabka
	Xumbo	Bixisaa hawada iyo kulka
	Kiimiko qallalan	Kala goysaa silsiladda falcelinta
<b>Hoorarka Guban Kara</b>  	Xumbo CO <sub>2</sub>	Bixisaa hawada
	Kiimiko qallalan	Kala goysaa silsiladda falcelinta
<b>Qalab Koranto</b>  	CO <sub>2</sub>	Bixisaa hawada
	Kiimiko qallalan	Kala goysaa silsiladda falcelinta
<b>Biraha Guban Kara</b>  	Demiyeyaal khaas ah	Caadi ahaan bixisaa hawada



XUSUUSTA  
BARAHA

### AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)

#### Muuji demiye biyo ah.

U sheeg kooxda in ilmaamaha caamka ah ee dab-bakhtiiyeyaasha biyaha isticmaala ay ka mid yihiin:

- Mugga. Mugga caadi ah waa 2½ gaaloon.
- Gaari kara. Gaari kara caadi ahaan 30-40 fiit.
- Cadaadis. Cadaadiska caadiga ah waa 110 rodol injigii isku-wareeg ahba.

Uga dig kooxda in ay isticmaal taxaddar dheeraad ah marka ay isticmaalayaan dab-bakhtiiye si ay u xaqiijiyaan in biyaha oo cadaadis saaran yahay aanay sii firdhinin alaabaha miisaanka yar oo sii faafin kara dabka.



XUSUUSTA  
BARAHA

#### Muuji demiye kiimiko qallalan ah.

U sheeg ka qayb-galayaasha in demiyeaasha kiimikaad ee qallalan ay sidoo kale caam ku yihiin:

- Demiyeyaasha kiimikaad ee qallalan ayaa leh soodiyam baykarbonayt waxaanay wax ka galaan dababka heerka B iyo C.
- Demiyeyaasha kiimikaad ee qallalan ee meelgalaha ah waxay leeyihiin sal monoammoniyam fosfayt ah waxaanay wax ka galaan dababka heerka A B iyo C.

Tilmaamaha caamka ah ee ay leeyihiin demiyeyaasha kiimikaad ee qallalan waxaa ka mid ah:

- Mugga. Adigu 10-20 ilbiriqsi oo waqti dib u dabayn ah.
- Gaari kara. Gaari kara caadi ahaan 8-12 fiid.
- Cadaadis. Cadaadiska caadiga ah waa 175-250 injigii isku wareeg ahba.

Sharax in inkastoo weli la isticmaalo, ay haddana, bakhtiiyeyaasha kaarboon dhayoksaydh iyo kuwa kale oo khaaska ahba ay sii noqonayaan kuwo aan badnayn.

**AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)**

**GO'AANSIGA ISTICMAALKA DAB-BAKHTIYE**

U sheeg ka qayb-galayaasha in ay jiraan su'aalo taxane ah oo ay tahay inay is weydiiyaan inta aanay dab kula dagaallamin dab bakhtiye.

Adkee in haddii ay ka qaybgalayaashu "MAYA" uga jawaabaan mid ka mid ah su'aalahan, waa in ay:

Ka tagaan dhismaha markiiba.

Xiraan dhamaan albaabbada markay baxayaan si ay u yareeyaan faafidda dabka.

U sheeg ka qaybgalayaasha in haddii ay su'aalahan oo dhan "HAA" uga jawaabtaan, waxay isku deyi karaan in ay dabka bakhtiiyaan. Xitaa haddii aad "HAA" uga jawaabtaan dhamaan su'aalaha, aadse dareentaan inaad bakhtiin karayn dabka, waa inaad markiiba iska tagtaan.

U dir ka qaybgalayaasha shaxda, *Go'aansiga Isticmaalka Dab-bakhtiye*, ee ku yaal Buugga Ardayda, kooxdana la muraajicee go'aannada:

- Ma u fakan karaa degdeg anigoo bedqeba haddii aan isku dayo inaan bakhtiyo dabka? (Muhiimadda ugu weyn ee adiga iyo saaxiibkaaba waa bedbaado.)
- Ma haystaa dab bakhtiye noocii la rabay ah?
- Dab bakhtiiyuhu baaxad ahaan ma ku filan yahay dabka?
- Aaggu xor ma ka yahay khataro kale sida alaabo halis ah iyo qashin soo dhacaya?




PM, P. 2-20

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA  
CUTUB 2: BEDBAADADA DABKA



PM, P. 2-20

Noocyada Dabka, Demiyeyaasha, iyo Dariiqooyinka



**Extinguish the Fire!**

Xaashida gigan ayaa muujinaysa hannaanka go'aan qaadashada in la isticmaalo dab bakhtiiye iyo in kale. Go'aanku wuxuu ku salaysan yahay afar su'aalood:

- Ma u fakan karaa degdeg anigoo bedqeba haddii aan isku dayo inaan bakhtiiyo dabka?
- Ma haystaa dab bakhtiiye noocii la rabay ah?
- Dab bakhtiiyuhu baaxad ahaan ma ku filan yahay dabka?
- Aaggu xor ma ka yahay khataro kale sida alaabo halis ah iyo qashin soo dhacaya?

Haddii dhamaan su'aalahan aad "haa" uga jawaabtay, xubnaha CERT waa inay isku dayaan in ay bakhtiiyaan dabka. Haddii jawaabta qaar ka mid ah su'aalaha ay noqoto "maya," xubnaha CERT waa in ay iska tagaan.



XUSUUSTA  
BARAHA

### AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)

**Weydii ka qayb-galayaasha haddii ay qabaan wax su'aalo ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo tilmaantaan go'aan-qaadashada ah.**

### ISTICMAALIDDA DAB-BAKHTIYAHA

Ku bilow sheegidda sida dab bakhtiye loo isticmaalo su'aasha soo socota.



WEYDII SU'AAL

**Imisaa idinka mid ah oo ay qabsatay in ay isticmaalaan dab bakhtiyaha la qaadan karo?**

Gacmo taagid ka dib, ka codso dhawr ka qaybgale in ay natiijooyinka ka sheekeeyaan. U isticmaal faalladooda in aad faah-faahiso mawduuca.



XUSUUSTA  
BARAHA

**Muuji sida loo isticmaalo dab bakhtiyaha la qaadan karo.**



PM, P. 2-21


U dir ka qaybgalayaasha shaxanka uu ciwaankiisu yahay, *Waxyaabaha uu ka Kooban Yahay Dab-bakhtiye la Qaadan Karo* ee ku yaalla Buugga Ardayga. Sharax in dab-bakhtiye a qaadan karo uu ka kooban yahay afar qaybood:

- Cadaadshaha
- Tubbo
- Dhululubo
- Gacanka qaadidda iyo farganka



PM, P. 2-21

Waxyaabaha uu ka Kooban Yahay Dab-bakhtiiye la Qaadn  
Karo



Waxyaabaha uu ka kooban yahay dab-bakhtiiyaha la qaadn karo: tubbo, gacanka lagu qaado iyo farganka, cadaadshaha, iyo dhululubada.





MUUQAAL 2.12

**AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)**

U sheeg kooxda in ay mar kasta dab-bakhtiye ku shaqeeyaan isagoo kor u jeeda.

**P.A.S.S.**

- Pull [Jiid]
- Aim [Ku aaddi]
- Squeeze [Tuuji]
- Sweep [Ku xaaq]

Tijaabi dab bakhtiyaha intaadan wajihin wax dab ah.

Muuqaal 2.12

Sharax soo gaabinta isticmaalka dab-bakhtiye ee P.A.S.S.:

Pull [Jiid]

Aim [Ku aaddi]

Squeeze [Tuuji]

Sweep [Ku xaaq]

Si aad u xaqijiso in uu dab-bakhtiye shaqaynayo, tijaabi inta aadan dabka u dhawaan.



XUSUUSTA  
BARAHA

**Muuji P.A.S.S. inta aad sharaxaadda ku jirtid.**



PM, P. 2-22


U dir ka qaybgalayaasha shaxanka PASS ee ku yaalla Buugga Ardayga.

Adkee baahida loo qabo in la toogto salka dabka oo sharax in ka qaybgale kasta uu heli doono firsad uu farsamadiisa adeegsado markii loo dhawaado dhamaadka xisadda.



PM, P. 2-22

P.A.S.S.



PASS: Pull [Jiid, ] Aim [Ku aaddi] Squeeze [Tuuji,] Sweep [Ku xaaq]



XUSUUSTA  
BARAHA

### AGABKA DAB-LA-DIRIRKA (WELI SOCDA)

**Weydii in ay cidi su'aal ku saabsan dabdemisyada iyo ku shaqayntooda qabto.**

Sharax in xisadda tan xigta ay la xaali doonto xeerarka bedbaadada oo la raacayo marka dabka la xakamaynayo.



MAWJUUC  
SHEEG

### BEDBAADSANAANTA XAKAMAYNTA DABKA

Ku billow qaybtan adigoo ka qayb-galayaasha xusuusinaya in ka xubno CERT ah haddii ay yihiin, xakamaynta dabku waa mid ka mid ah doorarkooda. Si kastaba ha noqotee, xitaa musiibada ka dib, nabdoonaantaada shaqsinnimo waa inay tahay walaaciinna koowaad. Ma awoodi doontaan in aad cidna caawisaan haddii aad qiyaas xumo iyo fal aan nabdoonayn ku dhaawacantaan.



PM, P. 2-22 &  
2-23

U dir ka qaybgalayaasha layska *Xeerarka Bedbaadsanaanta Xakamaynta Dabka* ee ku yaal Buugga Ardayga.



PM, PP. 2-22 &  
2-23

**Xeerarka Bedbaadada Dab Xakamaynta**

Xeerarka bedbaadada dab xakamaynta waxaa ka mid ah:

- Isticmaal qalabka nabdoonaanta mar kasta. Xiro helmetkaaga, ookiyalkaaga, maaskarada siigada, galoofyo maqaar ah, iyo kabo culus. Haddii aadan ku hubaysnayn qalab kugu filan, ka bax dhismaha.
- La shaqee jaalle. Saaxiibbada waxay qabtaan dan muhiima. Waxay ilaaliyaan nabdoonaantaada. Weligaa haysku deyin inaad keligaa dab la dirirtid.
- Hayso koox gurmada ah, markay suuraggal tahay. Micne ayayba samaynaysaa koox gurmada ah. Koox gurmada ah waxay kugu taageeri kartaa akamaynta dabka, wuxuuna ku siin karaa caawin haddaad u baahato.
- Mar kasta hayso laba dariiq oo aad aagga dabka uga baxdo. Dababku waxay u fidaan si ka dhaqso badan sidaad u malaynayso. Mar kasta hayso qorshe fakasho oo dheeraad ah haddii ay lacalla xiranto meshii aad ka bixi lahayd ee weyneyd.
- Ku tijaabi gacanta dhabarkeeda albaabbada xiran, adigoo ku wada hoosta albaabka ilaa kor. Ha taaban gacanka albaabka adigoo taaban albaabka. Haddii uu albaabku kulul yahay, dab baa ka dambeeya. Ha gelin! Furidda albaabku waxay dabka sii siinaysaa oksijiin hor leh.
- Go'doomi dabka, markasta oo ay suuroggal tahay, adigoo albaabbada xiri.
- Joog dhulka si hoose. Qiiq si dabiici ah buu u kacaa. U dhawaanta dhulku waxay ku siin hawo cusub oo aad neefsato.
- Joog fogaan nabad ah. Xusuusnow bedka wanaagsan ee aad la istaagayso dab-bakhtiyaha. Ha uga dhawaan intii muhiim ah si aad dabka u demiso.
- Gebaqqabee dabka si aad u xaqiijiso in uu bakhtiyey—oo uu bakhtiisnaan doono.

Waxa aysan CERTyadu sameynin markay dab xakamaynayaan ayaa u muhim ah sida waxay tahay in ay sameeyaan. HA YEELIN:

- Aad ha ugu dhawaan. Meel u dhaw fogaanta ugu badan ee aad wax ka bakhtiin kartid jog. Haddaad kulaylka dareento, aad baad ugu dhawdahay.
- Ha la diririn dabka keligaa. Xusuusnow in muhiimaddaada koowaad ay tahay nabdoonidaada. Naftaada khatar ha gelin.
- Ha isku deyin inaad bakhtiiso dababka waaweyn. Baro awoodda qalabkaaga, hana isku deyin inaad demiso dab ka weyn qalabka aad haysato (tusaale., dab ka weyn isuggeynta awoodda dab-bakhtiiyeyasha la hayo oo dhan).
- Ha gelin aagagga uu qiiqu ka buuxo. Dab ka xakamaynta meelaha uu qiiqu ka buuxo waxay u baahan tahay qalab aysan CERTyadu haysan.



MUUQAAL 2.13

**BEDBAADSANAANTA XAKAMAYNTA DABKA (WELI SOCDA)**

**Bedbaadsanaanta Xakamaynta Dabka**

Samee:

- Isticmaal qalabka nabdoonaanta.
- La shaqee jaalle.
- Hayso koox gurmada ah.
- Hayso laba jidood ku baxdo.
- Joog fogaan nabad ah.
- Gabaggabee dabka.

Muuqaal 2.13

Adkee muhiimadda dhamaan xeerarka bedbaadada dab xakamaynta.

- Isticmaal qalabka nabdoonaanta mar kasta. Xiro helmetkaaga, ookiyalkaaga, maaskarada siigada, galoofyo maqaar ah, iyo kabo culus. Haddii aadan ku hubaysnayn qalab kugu filan, ka bax dhismaha.
- La shaqee jaalle. Saaxiibbada waxay qabtaan dan muhiima. Waxay ilaaliyaan nabdoonaantaada. Weligaa haysku deyin inaad keligaa dab la dirirtid.
- Hayso koox gurmada ah, markay suuraggal tahay. Micne ayayba samaynaysaa koox gurmada ah. Koox gurmada ah waxay kugu taageeri kartaa akamaynta dabka, wuxuuna ku siin karaa caawin haddaad u baahato.
- Mar kasta hayso laba dariiq oo aad aagga dabka uga baxdo. Dababku waxay u fidaan si ka dhaqso badan sidaan u malaynayso. Mar kasta hayso qorshe fakasho oo dheeraad ah haddii ay lacalla xiranto meshii aad ka bixi lahayd ee weyneyd.
- Ku tijaabi gacanta dhabarkeeda albaabbada xiran, adigoo ku wada hoosta albaabka ilaa kor. Ha taaban gacanka albaabka adigoo taaban albaabka. Haddii uu albaabku kulul yahay, dab baa ka dambeeya. Ha gelin! Furidda albaabku waxay dabka sii siinaysaa oksijiin hor leh.

XUSUUSTA  
BARAHA

MUUQAAL 2.14

**BEDBAADSANAANTA XAKAMAYNTA DABKA (WELI SOCDA)**

- Go'doomi dabka, markasta oo ay suuroggal tahay, adigoo albaabbada xiri.
- Joog dhulka si hoose. Qiiq si dabiici ah buu u kacaa. U dhawaanta dhulku waxay ku siin hawo cusub oo aad neefsato.
- Joog fogaan nabad ah. Xusuusnow bedka wanaagsan ee aad la istaagayso dab-bakhtiyaha. Ha uga dhawaan intii muhiim ah si aad dabka u demiso.
- Gebaggabee dabka si aad u xaqiijiso in uu bakhtiyey—oo uu bakhtiisnaan doono.

**Si kooban u sharax hannaanka gebaggebaynta dabka.**

**Bedbaadsanaanta Xakamaynta Dabka**

HA YEELIN IN:

- Aad isku daydo bakhtiinta dabab waaweyn.
- Aad aad ugu dhawaato dabka.
- Aad kelidaa la dirirto dabka.
- Aad gasho meelo uu qiiq ka buuxo.

Muuqaal 2.14

Adkee waxa aysan CERTyadu sameynin markay dab xakamaynayaan ayaa u muhiim ah sida waxay tahay in ay sameeyaan. HA YEELIN:

- Aad ha ugu dhawaan. Meel u dhaw fogaanta ugu badan ee aad wax ka bakhtiin kartid jog. Haddaad kulaylka dareento, aad baad ugu dhawdahay.
- Ha la diririn dabka keligaa. Xusuusnow in muhiimaddaada koowaad ay tahay nabdoonidaada. Naftaada khatar ha gelin.
- Ha isku deyin inaad bakhtiiso dababka waaweyn. Baro awoodda qalabkaaga, hana isku deyin inaad demiso dab ka weyn qalabka aad haysato (tusaale., dab ka weyn isuggeynta awoodda dab-bakhtiyeyaasha la hayo oo dhan).

**BEDBAADSANAANTA XAKAMAYNTA DABKA (WELI SOCDA)**

- Ha gelin aagagga uu qiigu ka buuxo. Dab ka xakamaynta meelaha uu qiigu ka buuxo waxay u baahan tahay qalab aysan CERTyadu haysan.

Sharax in dab-bakhtiiyayaasha la la qaato lagu jaangooyo xajmiga dabka ay demin karaan. Jaangoyntan waxaa ku cad lambar ahaan in dab-demiyayaasha 1 ilaa 40 ay yihiin Class A, kuwa 1 ilaa 640 na ay yihiin dab-demiyeyaal Class B ah. Jaangoyntani waxay ka muuqan doontaa calaamadda–2A:10B:C, tusaale ahaan. Markay lambarradu sii weynaadaanba waxaa sii weyn heerka gaarka ah iyo xajmiga dabka dab demiyaha ee loo isticmaali karo. (Xusuuso in noocyada heerka sare ahi inta badan waa culays badan yihiin. Hubi in aad qaban kartid oo ku shaqayn kartid inta aadan iibsaniin.)

Lambar lama socdo dabdemiyaaha jaangooyadiisu ay tahay Class C. C-da ka muuqata calaamadda waxay muujinaysaa in dab-demiskaasi dababka korantada oo keliya loo isticmaali karo.

Dab-demisyada loogu talaggalay nooca dab ee Class D waa in ay is yeeshaan nooca birta ah ee gubanaysa. Dab-demiyayaashaanuna ma leh jaangooyooyin lambar ah. Dab-demisyada dabka Class D waxaa ku calaamadsan lays faahfaahinaya biraha ay demin karaan unugyada wax demiya ee dab-demiskaa ku jira.



XUSUUSTA  
BARAHAS

**Dan qorshayneed sababteed, sharax in dab yari:**

- Uu le eg yahay baaldiga qashin qubka ah.
- Waxaa lagu demin karaa hal dab-demiye.

**Xusuusi kooxda muujintii hore (isticmaalidda suufka gubanaya eek u jirey dhalada Pyrex®) si aad u adkayso muhiimadda gebagebaynta dabka.**

**Weydii kooxda haddii uu jiro qof su'aal ka qaba bedbaadsanaanta xakamaynta dabka.**

Kooxda u sheeg in xisadda tan xigta ay wax uga baran doonaan aqoonsiga maaddooyinka halista ah.





MAWDUUCA  
SHEEG



WEYDII SU'AAL



MUUQAAL 2.15

### MAADDOOYINKA HALISTA AH

Ku billow mawduucan adigoo weydiinaya su'aasha hoose.

**Sideed ku ogaaddaa in ay maaddo tahay mid halis leh?**

Sii kooxdu waqti ay ku jawaabto.

#### Maaddooyinka Halista Lehi . . .

- Nasikhaan alaabta kale.
- Qarxaan ama sahal u gubta.
- Biyaha xoog uga falceliyaan.
- Aan degganayn markii loo feydo kulka ama shoogga.
- Sun ku ah dadka, xoolaha, ama bay'adda.

Muuqaal 2.15

Sharax in maaddooyinka loo tixgeliyaa in ay halis yihiin haddii ay wax ka mid ah tilmaamaha hoos ku taxan leeyihiin:

- Nasikhaan alaabta kale.
- Qarxaan ama sahal u gubta.
- Biyaha xoog uga falceliyaan.
- Aan degganayn markii loo feydo kulka ama shoogga.
- Si kale sun ugu ah dadka, xoolaha, ama bay'adda.

**MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)**

Sharax in alaabaha halista ah ay ka mid yihiin aanayse ku koobnayn:

- Walxaha qarxa.
- Gaasaska iyo hoorarka ololi kara.
- Sunta iyo gaaska sunta ah.
- Jara/googgooya
- Gaasaska aan ololi karayn.
- Oksidheeyada.
- Maaddooyinka shucaacyada.



WEYDII SU'AAL

**Maxay muhiim u tahay in ay maaddooyinka halista ahi meesha yaalliin?**

Aqoonso jawaabaha ka qaaybgalayaasha, dabadeedna sharax in ogaanshaha in ay maaddooyinka halista ahi meesha yaallaan ay ku caawiso nabdoonaanta xubnaha CERTyada aanay qiimayn muhiima u tahay jawaabayaasha koowaad.

Carrabka ku adkee in maaddooyinka halista ahi ay yihiin khatar mar kasta taagan. Iyo in lagu kaydiyaa nooc kasta oo meel ah, loona safriyo siyaabo kala duwan.



MUUQAAL 2.16

**MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)**  
**AQOONSIGA MAADDOOYINKA HALISTA AH OO KAYDSAN**

Aqoonsiga Maaddooyinka Halista ah oo Kaydsan

**Dheemanka NFPA 704**

Muuqaal 2.16



WEYDII SU'AAL

**Midkiinna abid ma arkay calaamadda ku taal muuqaalka ama mid u eg? Midkiinna ma yaqaan waxay tahay iyo micnaheeda?**

Haddaanay kooxdu sheegin, sharax in shaxanka sare uu yahay Dheemanka NFPA 704 —oo ah hab aqoonsiga uu qarraray National Fire Protection Association. Dheemanka NFPA 704 waa hab faham wanaagsan ee lagu aqoonsado khataraha la xiriira aalado khaas ah. Xaashidan waxaa laga heli doonaa dhismaha joogtada ah.

Ka qaybgalayaasha u sheeg in dheemanka loo qaybiyo afar rubuc oo midabaysan, oo mid kasta uu gudaha ku leeyahay lambar muujiya xaddiga khatarta la xiriirta alaabtaa. **Markuu lambarku weynaadaba, khatartuna waa weynaataa!**

**Dheemanka NFPA 704**

- Rubuca guduudan wuxuu qeexaa in ololi karidda maaddada
- Rubuca buluuga ah wuxuu mujiyaa halis caafimaad.
- Rubuca jaallaha ah wuxuu muujiyaa falcelin.



MUUQAAL 2.17

**MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)**

**Aqoonsashada Maaddooyinka Halista ah oo Kaydasan**

NFPA 704 Dheeman-rubuc cad:

**W** Muusaa falcelin aan caadi ahayn oo biyaha ah

**OX** Leedahay alaab oksidhahayneed

Muuqaal 2.17

Tilmaan in rubuca cad uu muujiyo taxaddarro khaas ah. Waxaa jira laba calaamadood oo lagu khaas yeelay Baaqyada Qaranka ee Dabka, qaybta 704.

- ~~W~~ Waxay muujisaa maaddo biyaha aad uga falcelisa (waa inaan abid biyo lagu qasin ama lagu bilbilin). Birta Magniishiyam ayaa tusaale u ah maaddo ka falcelisa biyaha.
- **OX** Waxay muujisaa alaab iska leh waxyaabo oksidheeyyaal ah. Ammooniyam nitrayt ayaa tusaale u ah maaddo iska leh oksidheeyyaal.

In kastoo ay calaamadaha sare ku qoran lagu khaas yeelay Baaqyada Qaranka ee Dabka Dheemannaada NFPA 704 waxay isticmaalaan calaamado dheeraad ah:

- ACID Muujisaa in maaddadu ay tahay asiidh..
- ALK Muujisaa in maaddadu ay tahay bays.
- COR Muujisaa in maaddadu ay tahay xoqe.



Muujisaa in maaddadu ay tahay shucaac.

### MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)

Carrabka ku adkee in lambarrada ku yaal Dheemanka 704 loogu talaggalay dabdemiye xirfadle ah keliya. Xubnaha CERT waa in ay u tixgeliyaan calaamadahaas “calaamad joojin” ah. Falka keliya ee ay xubnaha CERT ku kacaan marka uu dhisme ku calaamadaysan yahay calaamadda Dheemanka NFPA 704 waa in ay ka saaraan dadka ka jira dhinaca ur-hoosaadda, hadday muhiim tahay, oo ay u wadaan meel dug-sare ah.



XUSUUSTA  
BARAHA

**Magacaw ama isticmaal islaydhis (muujeyaal) si aad u tusto khataraha maxalliga ah ee gaadiidka iyo wixi kale oo tas-hiilaad ah oo isticmaala Dheemanka NFPA 704, si aad muhiimad hor leh u siiso wadhadalka.**

**Hadday suuraggasho, kooxda tus calaamada 704 oo dhab ah si aad aqoonsiga u kordhiso.**



MUUQAAL 2.18

### AQOONSIGA MAADDOOYINKA HALISTA AH EE SAFRAYA

Aqoonsiga Maaddooyinka Halista ah ee Safraya

Calaamadaha DOT

Muuqaal 2.18



WEYDII SU'AAL

**Ciduna ma aqoonsan tahay calaamadaha ku jira muuqaalka?**



XUSUUSTA  
BARAHA

### MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCOTA)

Haddii aanay sheegin ka qayb-galayaasha u sheeg kooxda in ay kuwani yihiin calaamadaha Wasaradda Gaadiidka (Department of Transportation (DOT) Calaamadaha DOT waa mid ka mid ah saddex dariiqo oo loo calaamadeeyo maaddooyinka halista ah ee safarka ku jira. Labada kalena waxay yihiin:

- Habka Qaramada Midoobay (The United Nations (UN).
- Calaamadaha digniinta ee Waqooyiga Ameerika (The North American (NA).

**Nidaamka calaamadinta NA waa sii dhamaanayaa laakiin mar mar baa la isticmaalaa, badanaa maaddooyinka halista ah ee laga soo rarayo Canada.**

Sheeg in calaamadahani ay ku yaalli karaan gaari kasta, ma ahan booyadaha keliya. Sidoo kale:

- Calaamad loogama baahna wax ka yar 1,000 rodol oo ka mid ah maaddooyinka halista ah.
- Maaddooyin halis ah oo la yaqaan (sida., anhidroos ammooniya) ayaa loo calaamadeeyaa ma ololayaal gaas ah markii ay gudaha ku safrayaan, laakiinse markii ay caalamka u safrayaan waxaa loo calaamadiyaa sida gaas ololi kara. (Anhydrous ammonia waa gaas ololi kara!)
- Mararka qaar wadeyaasha ayaa hilmaama in ay beddelaan calaamadda markii ay rarka beddelaan. Kooxdu waa inay aad iyo aad u taxaddaraan marka ay u dhawaanayaan waxna ka qaban rabaan gaari kasta oo shil galay.



XUSUUSTA  
BARAHA

**Haddii ay cidi ku weydiiso, maaddooyinka halista ah ee calaamadinta u baahan tiro kasta oo ay yihiin, waxaa ka mid ah gaasaska sunta ah ee keena halis neefsasho (DOT Class 2.3), hoorarka suntan ee keena halista neefsasho (DOT Class 6.1), iyo maaddooyinka shucaaca ah (DOT Class 7).**



PM, P. 2-27



XUSUUSTA  
BARAHA



MUUQAAL 2.19

### HAZARDOUS MATERIALS (CONTINUED)

Sharax in midabka calaamadaynta ee DOT uu laftiisu muhim yahay. U dir ka qaybgalayaasha muujinta *Calaamadinta DOT* ee ku yaal Buugga Ardayga.

**Hadday suuraggasho, kooxda tus calaamada DOT oo dhab ah si aad aqoonsiga u kordhiso.**

**Aqoonsiga Maaddooyinka Halista ah ee Safraya**

**Calaamadaha UN AND NA**

Muuqaal 2.19

U sheeg kooxda in uu muuqaalkani muujinayo hababka UN iyo NA. Hababka UN iyo NA waxaa lagu dul muujiyaa inta badan booyadaha, booyadaha rarka, karreetooyinka tareenka iyo haamaha la qadan karo.

Carrabka ku adkee in mar kasta dhinaca nabdoon khaladkoodu uu ahaado. Yaanay isaga malayn in, mar haddii aysan calaamadi jirin, aysan alaab halis ahuna jirin. U soo jeedi ka qaybgalayaasha in ay

- La hadlaan darawalka iyo xubnaha rakaabka mar kastoo ay suuroggal tahay.
- Xaalad kasta oo aanay garanayn ay ula dhaqmaan sidii oo ay tahay dhacdo maaddooyin halis ah.

Aad u muuji in sida Dheemanka NFPA 704, DOT, UN, iyo NA, calaamaduhu waa in ay “calaamad joogsii” u noqdaan xubnaha CERT.



XUSUUSTA  
BARAHA

**Weydii kooxda in ay jirto cid ka mid ah oo wax su'aalo ah ka qabta maaddooyinka halista ah ama sida loo aqoonsado iyagoo kaydsan iyo marka la safrinayaba.**



HAWL QABO

LAYLI: XAKAMAYNTA DABABKA YARYAR

**Ujeedo:** Layligani wuxuu ka qaybgalayaasha siin doonaa khibradda laba aag oo dab xakamaynta ah:

- Isticmaalidda dab-bakhtiye a qaadan karo si loo xakameeyo dab yar
- Ka shaqayntiisa hawl-wadareed markii dabka la xakamaynayo

Xaqiiji in dhamaan ka qaybgalayaashu ay dhar fiican gabaan, ayna xiran yihiin qalabka bedbaadsanaanta oo ku habboon layligan. Dharka layligani wuxuu iska noqon karaa mid caadi ah. Si kastaba ha noqotee dabaggaabyada iyo kabaha qaarka hore u furan waa in aan loo oggloaanin.



U  
DIYAARGAROW  
HAWL

Ku diyaari dab gaaska barobeyn ka yimid meel ugu yaraan 40 fiid oo aag furan gudahood ah oo ur-koraadka ka ah meesha dabku ka yimid. Fasalka dadka ku jira kala sii dab-bakhtiyeyaal la qaadi karo oo A:B:C kala ah. (Inta badan shirkadaha ku hawlgala adeegyada dabdemiska ayaa ku siinaya haddii aad u sheegto nooca dabeed. La xiriir shirkadaha maxalliga ah si ay kuu caawiyaan.)

Layligani wuxuu u baahan yahay labo macallin. Macallinka 1 wuxuu hagayaa layliga. Macallin 2 wuxuu u dhabbagelayaa layliga wuxuuna noqonayaa Sarkaalka Nabdoonaanta layliga.



XUSUUSTA  
BARAHA

**Waxaa mudan in lagu taliyo in la muujiyo tallaabooyinka muhiimka ah (sida., booska “diyaar”) inta aan loo oggolaan ka qaybgalayaashu in ay dhamaystirtaan layliga.**

**Tilmaamo:** Raac tallaabooyinka hoose si aad u dhamayso layliga.

**Ku tababar ka qaybgalayaasha inta layliga lagu jiro adigoo raacaya tilmaamaha ku qoran farta khadda badan leh.**

1. Ka dhig ka qaybgalayaaha kuwo ku shaqeeya koox labo-labo ah. Ku adkee xubnaha kooxuhu waa in ay wada xiriiraan. Muhiimadu waxay saran tahay nabdoonaan iyo wada-shaqayn.
2. Adigoo kaaxba mar qaadanaya, miid kasta oo xubnaha kooxda ah waxaad siisaa dab-bakhtiye la qaadan karo.
3. Macallin 2 ayaa dabka shidaya, isagoo isticmaalaya jid ifiye tiir dheer suran, marka uu Macallin 1 muujinayo in ay ka qaybgalayaashu diyaar u yihiin in ay layliga billaabaan.




**LAYLI: XAKAMAYNTA DABABKA YARYAR (WELI SOCDA)**

4. Intaadan ka qaybgalayaasha u oggolaan in ay layliga billaabaan, Macallin 1 waa inuu weydiyaa:
  - Meesha ay tahay tubaha ay ku fakanayaan.
  - Meesha ay dabayshu ka imanayso.
  - Haddii uu dabku fidayo iyo meesha uu iman karo 30 ka ilbiriqsi ee soo socda.
5. Weydiiso in Xubin Koox 1 uu qaato booska “diyaar” biinka oo jiidan, bakhtiyaha oo tooggan, korna u jeeda, hilaadda 20 ilaa 25 fiidna dabka u jira.

**Markuu u diyaar yahay in uu dabka wajaho, Xububin Koox 1 waa inuu yiraahdaa “Ready”, Xubin Koox 2 waa inuu ka daba yiraahdaa, “Ready.”**

**Marka uu Xubin Koox 1 billaabo in uu horay u socdo, waa inuu/inay y/tiraahdaa “Going in.” Xubin Koox 2 waa inuu amarka ka daba yiraahdaa oo uu joogaa meel uu ka gaaro Xubin Koox 1.**

6. Weydiiso in Ka qaybgale 2 uu metelaa taageere isagoo qaadanaya booska “diyaar” una jira intay gacani ka gaarto ka qaybgalaha 1.



7. Macallin 1 ha joogo inta u dhexaysa ka qaybgalayaasha iyo dabka inta layligu socdo oo dhan.

**Labada xubnood ee kooxduba waa in ay dabka xaggiisa u dhaqaaqaan. Xubin Koox 1 waa in uu dabka dhawraa Xubin Koox 2 na waa inuu u dhawyahay Xubin Koox 1 isagoo gacantiisa ku haya garabka Xubin Koox 1. Shaqada xubin koox 2 waa inuu ilaaliyaa Xubin Koox 1.**

**LAYLI: XAKAMAYNTA DABABKA YARYAR (WELI SOCDA)**

8. Weydiiso Xubin Koox 1 inuu dabka ka soo wajahaa dhinaca ay dabayshu u socoto (waa in dabayshu ay dhabarka ka babbinaayo xubinta kooxda). Marka uu qiyaasta u jiro 10 fiid dabka, Xubin Koox 1 waa in uu furaa bakhtiyaha isagoo ku aaddinaya salka dabka, sidaa ayuuna u wadayaa ilaa uu bedka ku habboon ee demiyuhu yahay noocii loo baahnaa.
9. Xubin Koox 1 waa in uu xaaqaa oo buufiyaa salka dabka ilaa uu dabku ka demo.

**Marka uu Xubin Koox 1 ka baxayo aagga dabka, waa inuu/ay t/yiraahdaa “Backing out.” Xubin Koox 2 waa in uu ku soo celiyaa amarka. Qaybqaate 2 waa in uu Qaybgale 1 gacmaha ugu haggaa meesha dabka marka uu qaybqaate 1 uu eegayo dabka isagoo khatar iska ilaalinaya.**

Markii dabka la demiyoo, weydiiso ka qaybgalayaasha in ay isku beddeshaan boosaska oo ku celiyaan layliga. Haddii uu waqtigu oggolaado, u ogolow ka qaybgale kasta in uu dabdemiyaha isticmaalo laba jeer si ay u korodho hawlku-qabadkiisa.

Ku celceli layligan o la same kooxaha kale inta ay dhamaan ka qaybgalayaashu ka helayaan fursad ay dabka ku demiyeen.



Soo Koob  
QODOBBADA  
MUHIIMKA AH

### GEBAGGEBADA CUTUBKA

Ku Gebaggabee buundooyinka muhiimka ah ee cutubkan in:

Xakamayn waxgal ah oo dab waxay ay ku xiran tahay fahmida:

- Caynka shidaal ee meesha ka jira.
- Walxaha loo baahan yahay si uu dabku u jiro.
- Heerka dabka.
- Alaabta loo baahan yahay lana hayo ee lagu deminayo nooc kasta oo dab ah.
- Farsamooyin waxgal ah oo dab xakamayn ah.

Dab wuxuu u baahan yahay kul, shidaal, iyo oksajiin si uu u jiro.

Waxa afar nooc, ama heer oo dab ah:

- Dabka Heerka A: Gubtayaasha caadiga ah
- Dabka Heerka B: Hoorarka ololi kara
- Dabka Heerka C: Qalabka korantada ee tamaraysan
- Dabka Heerka D: Biraha gubta

Waxaa aad u muhiima in la ogaado heerka dabka si loo xusho bakhtiiyaha ku habboon ee heerka dabkaas.

Si loo caawiyo fahmida maaddooyinkaas, waxaa jira dhawr dariiqo oo lagu calaamadiyo maaddooyinka halista ah ee la kaydiyo ama la safriyo, calaamadahaas oo ay ku jirto NFPA DOT, UN, iyo NA. Marka aad la kulanto shilal ay ku lug leeyihiin maaddooyin lagu calaamadiyey in ay yihiin khatar — ama marka aan maaddooyinka la aqoon—ka durug oo si degdeg ah ugu yeero caawin xirfadaysan.

Dab-bakhtiiyeyaasha la qaadan karo waxaa inta badan loo isticmaalaa xakamaynta dababka yaryar. Calaadaha ku dheggan ayaa muujiya noocyada dab ee ay wax ka qaban karaan ama aagga ay wax ka qaban karayaan.

Markaad isticmaalaysid dab-bakhtiiyeyaasha la qaadi karo, xusuusnow P.A.S.S.: Jid, Ku aaddi, Tuuji, Ku xaaq.

**GEBAGGEBADA CUTUBKA (WELI SOCOTA)**

Markaad xakamaynaysid dab, mar kasta raac xeerarka nabdoonaanta ee ay dejiyeen CERTyadu.

**SHAQO GURI IYO LAYLI**

Xusuusi ka qaybgalayaasha in ka hor casharka kan xiga, ay tahay in ay:

Aqriyaan oo fahamaan Cutubka 3: Hawlgallada Caafimaad ee Musiibada—Qaybta I oo ka mid ah Buugga Ka-qaybqaataha.

Soo hel oo xisadda la imow:

- 1 santuuq oo 4" □ 4" faashado ah.
- 1 faashad oo saddex xagal ah.
- 1 duub oo faashaadka duuban ah.
- 1 maaskaro caafimaad.
- 1 joog oo galoofyada baaridda ah.
- 1 buste.

U sheeg ka qaybgalayaasha in ay soo xirtaan dhar debacsan casharka kale, maxaa wacay waxay barbaran doonaan farsamooyin caafimaad.

Uga mahadceli ka qaybgalayaasha sida ay u yimaadeen xisadda. Hadday muhiim noqoto u sheeg maalinta iyo taariikhda xisadda tan ku xigta.